



Cabashooyin noocee ah ayaa ku habboon Xallinta Cabashada?

Cabashooyinka kala ah:

- Cabashooyinka nooc ahaan halistoodu yar tahay.
- Aan ku saabsanayn eedeymaha waxyeelada halista ah leh.
- Ku saabsan arrimo dhib yar.

Tusaale ahaan, waxay ku saabsanaan karaan:

- **Xurmo-darro** – sida uu sarkaal ula hadlay ama ula dhaqmay xubin ka mid ah dadweynaha.
- **Dayicid Waajib** – meesha uu sarkaal gabay gudashada waajibkii laga rabay in uu fuliyo.
- **Ku-xadgudub Awoodeed** – tabashooyin la xiriira xiritaano, qabashooyin, baaritaano iyo adeegsi xoog heerar hoose ee booliis.

Tusaalayaal natiijooyinka:

- Raalligalin.
- Ka garaabid saameynta dhaqanka sarkaalka.
- Is-dhaafsi aragtiyo.
- Tababar la siiyo sarkaalka.

Waa Maxay Doorka Xafiiska Xallinta Cabashada Booliiska?

Waxaan xaqiijinaa helitaanka xalal waxtar iyo isla-xisaabtan leh.

Xafiiska Xallinta Cabashada Booliiska wuxuu xaqiijiyaa caddaalada habka xallinta iyo natiijooyin macna leh oo ay helaan dadkii ku lug lahaa.

Waxaan dib u eegnaa dhammaan cabashooyinka oo haddii ay habboon tahay, dadka ku dhiirrigalinaa in ay isku dayaan habka Xallinta Cabashada si ay u xalliyaan cabashadooda.

Waxaan siin karnaa hellidda adeegyo caawin oo loogu talagalay bulshada si gacan looga siiyo habkaan.

Xafiiska Xallinta Cabashada Booliiska wuxuu dib u eegaa xal kasta si loo xaqiijiyo in uu yahay mid munaasab ah oo ku filan.



Naga La Soo Xiriir

Telefoonka: (250) 356-7458
Faksiga: (250) 356-6503
Telefoonka lacag la'aanta
ah ee goobaha fogfog:
1-877-999-8707
limeylka: info@opcc.bc.ca



Goobta Shaqada

2nd floor, 947 Fort Street
Victoria, British Columbia



Cinwaanka Boostada

PO Box 9895, Stn Prov Govt
Victoria, BC V8W 9T8

Wixii xogo dheeraad ah booqo
barteena internetka ah

www.opcc.bc.ca

Hellidda Xal, si wadajir ah



OFFICE OF THE
POLICE COMPLAINT
COMMISSIONER



Xallinta Cabashada

Hab waxtar iyo isla-xisaabtan leh oo lagu xalliyo cabashooyinka booliiska

Hufnaan, Madaxbannaani, Caddaalad

www.opcc.bc.ca

Waa Maxay Xallinta Cabashada?

Waa hab loo xalliyo cabashooyinka fudud oo darfaha siisa fursad ay qeyb uga noqdaan natiijada cabashada. Habkaanu waa hab waxtar iyo isla-xisaabtan leh oo lagu xalliyo cabashooyinka.



Sidee habkaanu u shaqeeyaa?

Habka xallinta cabashadu waa rabitaan wuxuuna dhici karaa wakhti kasta inta lagu dhex jiro habka cabashada. Qofka cabanaya iyo sarkaalka booliisku waa in ay isla ogolaadaan in ay la shaqeeyaan fududeeyaha, kaas oo labada daraf ka caawinaya in xal la gaaro. Ma aha khasab in aad wada kulantaan si aad uga qeybgashaan. Labada qof midkood walba waa ka bixi karaa habka marka uu rabo. Haddii taasu dhacdo, cabashadu way sii soconaysaa in la sii wado baaritaanka.

Haddii habka lagu guuleysto, dhinacyada oo dhama waxay isku raacayaan xal. Xalka la soo jeediyey waa mid qoraal ah, waxaana ku jira qodobada gaarka ah (natiijooyinka) ee heshiiska.



Waa maxay faa'iidooyinka aan ka helaayo habka Xallinta Cabashada?

Dadka cabanaya iyo saraakiisha booliiska. Labaduba waxay haystaan fursad ay ku wadaagaan aragtiyahooda kuna helaan xal mideysan oo lagu xalliyo dhacdada.

Xallinta Cabashadu waxay fursad weyn oo waxbarasho siisa qof walba.

Faa'iidooyinka kale waxaa ka mid ah:

- Talo soo jeedin toos ah oo lagu xallinayo cabashadaada.
- Helidda jawaabaha su'aalahaaga.
- Xallinta cabashadaada oo degdeg ah.
- Waxaa lagu dari karaa caadooyinka ama hab-maamuusyada dhaqan ahaan khuseeya.

Natiijooyin togan (wanaagsan)

Ka-qeybgalayaal badan waxay u arkeen habka mid waxtar u lahaa wax ka qabashada tabashooyinkooda. Waa kan wixii dadka qaarkood ay ka yiraahdeen:



“Habkaanu wuxuu iga caawiyey soo celinta kalsoonidii aan ku qabay sarkaalka iyo qeybta booliiska labadaba.”



“Waxaan dareemay in la i maqlay.”



“Wixii igu farxadgalin badnaa wuxuu ahaa raalligalin aan ka helay sarkaalka iyo helidda garawshiyaha in uu si ka wanaagsan ii wajihi karay.”

Qarsoodi

Xallinta Cabashadu waa qarsoodi, oo ay ku jiraan dhammaan xogaha isgaarsiinada iyo xalka ugu dambeeya.



Wac 1-877-999-8707 lacag la'aan
ama booqo www.opcc.bc.ca

